

Talaalka korona feyraska ee Turku

Talaalkii cudurka korona feyraska Turku waa laga bilaabay. Talaalku waa mid uu qofku u madax banaan yahay waana u bilaash dhammaan dadka sida rasmiga ah u deggan Finland oo dhan.

Turku waxaa lagu bilaabay talaalada dadka da'adoodu ka weyn tahay 80-jirka ee reer Turku. Marka hore waxaa la talaalayaa dadka da'aha waaweyn markaas ka dibna talaalada waxaa gugoo dhan lagu sii wadayaa da'aha yaryar.

Muwaadiniintu iyagaa iskood u qabsanaya ballamaha talaalka iyagoo uga qabsanaya ballamaha elektarooni ahaan edeegga ballan qabsashada ama telefoonka talaalka koronaha dhinaciisa. Talaalka waa in mar walba ballan loo qabsadaa elektarooni ahaan ama telefoon ahaan.

Dhammaan warbixinaha ku saabsan talaalka koronaha ee Turku:

Warbixinaha xilligan taagan ee marba kooxaha la talaalayo waxaad ka heleysaa bogga-talaalka koronaha ee magaaladda Turku finnish ahaan, iswidhish ahaan iyo ingiriisi ahaan:

- www.turku.fi/koronarokotus
- www.turku.fi/sv/coronavaccinationer
- www.turku.fi/en/coronavirusvaccinations

Intaa waxaa dheer oo aad magaaladda Turku bogeeda internetka ka heleysaa la talinta koronaha- Åbot, taas oo kuugu adeegaysa tobonaan luqadood oo kala duduwan.

Bogagaas waxaa kale oo aad ka heleysaa "su'aalaha badanaaba la is weydiyo"-bogga laga helayo jawaabaha guud ahaaneed ee ku saabsan talaalka koronaha weydiimihiisa.

Telefoonka talaalka koronaha eeTurku

Telefoonka talaalka koronaha ee magaaladda Turku wuxuu kuu adeegayaa isniin-jimce saacadaha 8-14, t. 02 266 0159. Telefoonka waxaa laga qabsanayaa ballanta talaalka koronaha ama waxaad weydiin kartaa arrimaha la xidhiidha talaalka.

Goobta talaalka lagu talaalayo ee Turku waa xarunta carwooyinka (messukeskus)

Marka la soo gaadho xilligii lagu talaalayay, ballan ka qabso elektarooni ahaan dhinaca adeegga ballan qabsashada ee (www.turku.fi/koronarokotus) ama waco telefoonka talaalka koronaha.

Talaalada waxaa lagu bixinayaa xarunta carwooyinka ee Turku (cinwaankuna waa Messukentänkatu 9–13). Halkaas waxaad ku iman kartaa **bus ama gaadhigaaga**. Dadka ku imaanaya gaadhigu waxay heleyaan baarkino aad u badan oo bilaash ah. Buska tagayaa waa nro 100 kaas oo ka dhex shaqeynaya badhtamaha magaaladda Turku ilaa iyo xarunta carwooyinka isniinta ilaa jimcaha.

Maxaa loo baahan yahay in aad fiiro u yeelatid markaad imanaysid xarunta carwooyinka?

- Imow adiga oo aanan lahayn calaamadaha koronaha
- Ku dhaqan masaafadda la isku jirsanayo iyo nadaafadda gacmaha
- Isticmaal af iyo san daboolka markaad imanaysid iyo intaad xarunta carwooyinka joogtidba
- **1. xaaladdo caafimaad awgood dadka xanuunada ugu nugul dadka ku jiraa** waa inuu ku soo talogalo in uu soo bandhigo sababta uu uga tirsan yahay dadka jirooyinka u nugul, tusaale ahaan kaadhka- kelada, cadeynta dhakhtarka ama calaamad kale oo ku xusan nidaamka warbixinta bukaanka.
- Ku imow xilligga ballanta lagu qabtey (gudaha waxaad soo gali kartaa 15 daqiiqo ka hor xilligga ballantaada talaalka)
- Horey u soo qaado kaadhkaaga- Kelada
- Soo gasho funaanad aad si fudud isaga bixin kartid
- Talaalka ka dib waxaa haboon in aad ku soo talo gashid in talaalka ka dib aad goobta talaalka ku sugeysid muddo 15 daqiiqo ah

Wixii warbixin dheeraad ah ee la xidhiidha talaalka cudurka koronaha:

<https://thl.fi/en/web/infectious-diseases-and-vaccinations/what-s-new/coronavirus-covid-19-latest-updates/transmission-and-protection-coronavirus/vaccines-and-coronavirus>